



Ma heli karaa in dambiyadii mariwaanadda ee la igu helay la iga tirtiro? - Sharciyadda Cusub ee Mariwaanada ee MN

Can I get my marijuana convictions erased? - New Marijuana Laws in MN

Muxuu sharciga cusub ee Mariwaanaddu ku saabsan yahay?

Waxaa la yiraa Sharciyadda Iisticmaalka Dadka Waaweyn ee Kaanabiska (Adult-Use Cannabis Act). Kaanabisku waa magac kale oo loo yaqaan mariwaanadda. Dadka qaangaarka ah ee 21 sanno jirka ah ama ka weyn waxa ay ku haysan karaan kulana dhix safri karaan Minnesota:

- 2 wiqiyadood oo ubaxa kaanabaska ah,
- 8 garaam oo dhafaag ah iyo
- 800 milligaraam oo leh THC-ay ku jirto wax la cuni karo sidda xabagta iyo xumbada.



Waxa aad ku haysan kartaa ilaa iyo 2 rodol oo ubaxa kaanabiska ah guriga.

Laakiin taa ka taxadar! Xataa sharcigan cusub, wali baxar waa aad ku geli kartaa haysashada iyo isticmaalka mariwaanada:

- Sidda u qabo sharciga gobolku, kuma isticmaali **kartid** mariwaano:
 - dugsiyadda dowladda dhixdooda
 - meelaha sigaarka in lagu cabu aan loo ogolayn
 - goobo ay joogaan ilmo yaryar oo neefsan kara qaaca ama uumiga, ama
 - marka aad gaari wado
- Wali waa sharci-darro sidda uu dhigayo sharciga dowladda dhix in mariwaanada **loo kala gooshiyo goboladda**. Kama keeni kartid gobol kale, kamana qaadi kartid Minnesota oo ma geyn kartid gobol ama wadan kale.
- Waa sharci-darro wali in lagu haysto ama lagu isticmaalo mariwaano guriyaha **kiradooda ay kabto dowladda dhix**. Wixii kale ee akhbaar ah ee ku saabsan xeerarka guryaha dowladda, ka eeg buugayaga gacanta ee [A Guide to Public Housing in Minnesota \(Hagaha Guryaha Dowladda ee Minnesota\)](#).
- Qaar ka mid ah **dowladaha hoose** ee deegaanaddu waxa ay leeyihii sharcayo oranaya kuma isticmaali kartid mariwaano goobaha maxfalka ah. Waydii maamulka magaaladaada arintan si aad u ogaato waxa ay yihiin xeer hoosaadyadda ka jira.

- Waa aad ku geli kartaa baxar wali ku **haysashada ama ku isticmaalka shaqadaadda**. Laakiin hadii aysan shaqadoodu ahayn shaqooyinka noocyoo ka mid ah oo gaar ah, shaqadaada dhib kalama kulmi kartid ah haysashadda ama isticmaalka mariwaanadda kolka aadan shaqeynayn. Shaqooyinkaasi waa shaqooyinka sidda wadidda gawaarida waaweyn ama baasaska iskuulka ama daryeelida ilmaha ama dadka bukaanka ah.

Ka eeg wixii kale ee akhbaar ah shabakadda Minnesota's Office of Cannabis Management website (*Xafiiska Minnesota ee Maareynta Kaanabaska*) ee <https://mn.gov/ocm/>.

- **Haddii aadan ahayn muwaadin Mareykan (U.S.)**, hel talo dhanka sharciga ah ka hor haysashadda ama isticmaalka mariwaanadda. Waxa ay arrintani saameyn kartaa kiiska sharci (immigration) helidaada! Hadii aad codsanayso sharci (immigration) inaad hesho, ama aad is leedahay waxaa dhici karta inaad codsato sharci mustaqbalka, akhri qaybta ugu dambaysa ee warqadan xogta aruursan ah.

Ma run baa inaan heli karo in dambiyaddii mariwaanada ee horey la iigu helay la iga tirtiro?

Qayb ka mid ah sharcigan cusub ee la meelmariyey waa in dambiyadda yaryar ee mariwaanadda ee horey cid loogu helay laga tirtiro. Sharcigu waxa uu dhigaa tirtirid iskeed ah oo ah qaar ka mid ah macluumaadka taariikhda dambi gelida ee ku jira diiwaanadda Hogaanka Baarida Dambiyadda [Bureau of Criminal Apprehension's (BCA)].

Siddoo kale, Gole gaar ah oo qaabilسان Tirtiridda Dambiyada Kanabiska ayaa la sameeyey. Si uu dib ugu eego kiisaska dambiyada kabaa'irkha ah ee kanabiska. Kiis walba gaarkiisa ayey u eegaan. Waxa ay eegaan tirtiridda suurtagla ah, ama u bedelida dambiga kabaa'irkha ah ee qofka lagu soo oogay mid ka ladifan- sidda dambi darajo hoose ah.

Si aad wax badan uga ogato waxa ku jira diiwaanadaada dambiyada, meesha ay yaalaan, sidda loo arko ka eeg warqadayadda xogta aruursan ee [Diiwaanka Fal dambiyeedka](#).



Waa maxay tirtiriddu?

Tirtiraddi waa nidaam qariya diiwaanadda waxa ku jira. Waxa ay noqon karaan sidda waxyaabaha dambi ku helidyadda, xiritaanadda, iyo diiwaanadda kale. Diiwaanka waxa ku jira ee la tirtiraa MA aha sidii wax la baa'binayo oo kale. Bilayska, FBI, mas'uuliyyinta laanta socdaalka (immigration) iyo mas'uuliyyinta kale ee dowladdu wali waa ay u arki karaan galalka maxkamadda ee qarsoon sababo cayiman awgood.

Marka aad codsato shaqooyinka qaarkood ama shatiyadda shaqada, qaar ka mid ah hay'adahu waa ay arki karaan waxa ku jiray diiwaanadaadda ee la tirtiray. Kuwaasi waa hay'adaha sidda hay'adaha nidaamka cadaaladda, Waaxda Adeegyadda Bulshadda [Department of Human Services (DHS)] iyo Waaxda Caafimaadka (Department of Health).

Haddii uu dhib kaa haysto helid shaqo ama in lagu siiyo laysin meheradadeed, kala hadal qareen helid amar maxkamadeed. Amarka maxkamaddu waxa uu u sheegaa hay'adda (DHS) ka iyo Waaxda Caafimaadka (Department of Health) in la qariyo diiwaankaaga. Si aad u hesho qareen, ka wac adeegyadda gargaaradda dhanka sharciga (legal aid) ee deegaankaaga khadka ah [1-877-696-6529](tel:1-877-696-6529) ama ka eeg caawimaad kale barta <https://www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics>.

Siddee ayuu sharciga tirtirida iskeed ahi uu u shaqeeyaa?

Diiwaanadda taariikhda dambiyaddu dhawaan waxaa soo gaari doona ogaysiis ah in dambiyadda la xiriira kaanabasku ay xaq u leeyihiin tirtirid sidda uu dhigayo xeerka cusub ee Sharciga Istimcaalka Dadka Waaweyn ee Kaanabiska (Adult-Use Cannabis). Cayimaadaha ku saabsan sidda ay u shaqeyaan arrimahani iyo qaabka saxda oo u sharcigu dhigayo wali fahamkeeda waa laga shaqeynaya.

Maxkamadda iyo hay'adda BCA ayaa ka shaqeeya tirtirida kiisaska xaqqa u leh. Qiyaastii 66,000 oo dambiyo hoose oo kaanabiska la xiriira oo ku jira hay'ada (BCA) da Habkeeda Taariikhda Dambiyadda [Criminal History System (CHS)] ayaa xaq u leh inay iskood u tirtirmaan. Waxaa jira iyana 230,000 diiwaano ah oo ah dambiyadda darajadda dhexe iyo kuwa kaab'irka ah oo uu iminka eegaayo Golaha Tirtirida Dambiyada Kanabiska . Dambiyaddu waa ay ku sii jiri doonaan diiwaanka eedaysanaha ilaa iyo inta hay'adda (BCA) ay ka dhamaynayso cusboonaysiinteeda farsamo ee habka (CHS) ka.

Sidda uu dhigayo sharcigu, hay'adda (BCA) du waa inay ogaysiiso hay'adaha sharci ilaalinta iyo xafiisyadda xeer-ilaaliyeeyasha arrintan. LAAKIIN khasab kuma aha inay ogaysiiso eedaysanaha tirtiridda. Taa macnaheedu waa haddii dambi yar oo mariwaanadda ku saabsan lagugu helay, laguma soo ogaysiinayo kolka lagaa tirtiro.

Maxkamaddu waxa ay qorshaynaysaa inay soo geliso akhbaar ku saabsan habraacan shabakadda [Minnesota Judicial Branch](#) (*Laanta Cadaaladda ee Minnesota*). Waxa aad ka eegi kartaa horukaca BCA da ee ku saabsan soo cusboonaanta farsamo boggooda Tirtiridaha [Expungements page](#).

Siddee ku helaa tirtirid?

Sharcigu waxa uu yiraa waa in hay'adda (BCA) du ay raadiso dambiyo diiwaanadda ku jira oo xaq ugu leh in iskood loo tirtiro. Waxaa kaloo jira foom la yiraa [Request for Automatic Expungement of a Cannabis Offense](#) (*Codsiga Tirtiridda Iskeed ah ee Dambiyadda Kaanabiska*) Waxa aad ka xareysan kartaa foomkan maxkamadda haddii aad is leedahay kiiskaagu waxa uu xaq u leeyahay tirtirid iskeed ah sidda uu dhigayo sharciga cusubi. Ma jiraan wax badan oo akhbaar ah oo ku saabsan habka cusub qaabkiisa amaba inay wax caawiso in la xareeysto foomka, ama la sugo uun in tirtiridu ay dhacayso iyadoo qayb ka ah habka iskiis ah. Istimmaal kaliya foomka haddii aadan hubin in kiiskaagu uu xaq u leeyahay tirtiridda iskeed ah sidda u dhigayo sharciga cusubi. Haddii aadan hubin in kiiskaagu uu xaq u leeyahay la tasho qareen.

Ka waran haddii aanan ahayn muwaadin Mareykan (U.S.) ah?

Haddii aadan ahayn muwaadin Mareykan (U.S.) aadna codsanayso sharci (immigration) inaad hesho, ama aad is leedahay waxaa dhici karta inaad codsato sharci mustaqbalka, waxa aad u baahan tahay inaad u sheegto laanta socdaalka (immigration) dambiga lagugu helay ee mariwaanadda. Waa inaad ka hesho nuqulo (copies) diiwaanadaadda dambiyadda.



1. Waydiiso iminka hay'ada (BCA) nuqulo ah taariikhda

dambiyadda hadii lagugu soo eedeeyey ama lagugu helay dambi mariwaano. Ka dib kolka maxkamadahu ay u sheegaan hay'adda (BCA) inay tirtirto diiwaanada dambiyada kaanabaska, waxaa dhici karta inay adkaato inaad hesho qoraaladda aad u baahan tahay inaad u dirto laanta socdaalka (immigration).

Si aad u ogaato sidda looga helo nuqulo waxa ku jira diiwaankaaga dambiyada, ka eeg warqadayadda xogta aruursan ee, [Diiwaanka Fal dambiyeedka..](#)

2. Ka soo hel diiwaanadaadda habka Diiwaanadda Maxkamadda ee Khadka ee Minnesota (Minnesota Court Records Online-MCRO) iminkaba

haddii aad is leedahay waxaa lagugu soo eedeeyey ama lagugu helay dambi mariwaano. Qaar ka mid ah dambiyada darajadda hoose ah waxaa dhici karta inay adkaato in la helo warqadahooda mustaqbalka, laakiin waxa ay muhiim u noqon karaan kiiskaaga sharci siinta (immigration).

<https://www.mncourts.gov/Access-Case-Records/MCRO.aspx>

3. Xataa haddii kiiskaaga kaanabaska ah la tirtiray, mas'uuliyiinta laanta socdaalka

(immigration) ku wali waa ay arki karaan in lagugu soo eedeeyey ama lagugu helay dambi kaanabas ah. Kolka aad buuxinayso foomamka laanta socdaalka (immigration), daacad uga waran wixii dambi ah ee lagugu soo eedeeyey ama lagugu helay, xataa haddii la tirtiray.

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsii ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganaci ah waa mid si adag loo mamnuucay.